

Ka Xubin ahaan, waxaad xaq u leedahay:

Inaad si xor ah u hadasho haddii aadan faraxsanayn - aadna ogtahay in aadan dhibaato kala kulmi doonin muujinta walaacaaga

Inaad hesho macluumaadka la cusboonaysiiyay ee habraacyada Cabashada & Racfaanka

Inaad marka hore la hadasho kooxdaada daryeelka haddii aad qabto arrimo khuseeya go'aanka la gaaray ama adeegyadaada

In walaacaaga la maqlo

Inaad hesho go'aan wakhtiga ku haboon ee Cabashadaada ama Racfaankaaga

Xuquuqaha Xubinta iyo Cabashada & Racfaanka Medicaid

Waa maxay racfaan?

Racfaanka **waa** marka aad codsato in dib u eegis lagu sameeyo go'aanka ay gaaraan MCW ee khuseeya mid ka mid ah adeegyadaada. Go'aankani waxaa laga yaabaa inuu ahaa "go'aan macaash oo daran" kaasoo ah diidmo, dhimis, ama joojinta adeeg aad codsatay.

Sida racfaan loo xareeyo:

- La xiriir Khabiirka Xuquuqaha Xubinta si aad hawsha u bilowdo.
- Waxaad haysataa 60 maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiiska go'aanka aan gaarnay.
- Waxaan heysanaa 30 maalmood oo aan dib u eegis ku sameyno, go'aan uga gaarno racfaankaaga oo aan ku dabagalno warqadda.
- Haddii aad u malaynayso in caafimaadkaaga ama badqabkaaga si degdeg ah uu khatar ugu jiro, codso si aad u dedejiso racfaankaaga. Haddii la aqbalo, waxaanu go'aanka aan gaarno kugu siin doonaa 72 saacadood gudahooda.

Waa maxay cabasho?

Cabashada waa erey kale oo loogu yeero ashkatada. Waa qaab lagu muujiyo walaacaaga haddii aadan ku faraxsanayn My Choice Wisconsin (MCW), daryeel bixiye, ama tayada daryeelka ama adeegyadaada.

Sida loo xareeyo cabashada:

- Waxaad kala hadli kartaa arrimaha kugu taagan kooxdaada daryeelka ama kormeerahaaga.
- Waxaad la xiriiri kartaa Khabiirka Xuquuqaha Xubinta.
- Waxaad wakhti kasta xaq u leedahay inaad cabasho xaraysato.

**my choice**
WISCONSIN
BY MOLINA HEALTHCARE



Xuquuqaha Xubinta iyo Cabashada & Racfaanka Medicaid

Helitaanka caawimaada cabashadaada ama racfaankaaga

- Waxaad ka codsan kartaa caawimaad qof kasta oo aad jeclaan lahayd inuu kuu hadlo.
- Haddii aad jeclaan lahayd inaad caawimaad ka hesho meel wakaaladda ka baxsan, MCW ayaa ku siin karaan macluumaadka xiriirka ee hay'adaha kale.
- Khabiirka Xuquuqaha Xubnaha ee MCW ayaa kaa caawin kara inaad fahanto xuquuqahaaga iyo sida loo xareeyo cabashooyinka iyo racfaannada. Waxay kaa caawin karaan inaad go'aan ka gaarto habka ugu fiican ee adiga kugu habboon.
- Waxaad noo soo qori kartaa warqad ama na soo wac. Haddii aad boostada noogu soo dirto racfaankaaga ama cabashadaada, fadlan sharraxaad ka bixi waxa aad u malaynayso inay sixitaan u baahan yihiin iyo sababta. Waxaan racfaanka giri doonaa 5 maalmood oo shaqo ah gudahooda.

Macluumaadka xiriirka

Cinwaanka Boostada:

My Choice Wisconsin
Ku socoto: Khabiirka Xuquuqaha Xubinta
10201 W Innovation Dr. Suite 200
Wauwatosa WI 53226-4822

Khabiirka Xuquuqaha Xubinta Lambarada Taleefoonka

Macaashyada Family Care, Partnership, Dual Advantage

Lambarka Bilaashka ah: 1-800-963-0035 x 3448 TTY: 711
limeylka: mrs@mychoicewi.org

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg:

- Buug-gacmeedkaaga Xubinta
- **Mareegteena:** mychoicewi.org/contact/grievances-appeals/
- Caddeynta Dukumeentiga caymiska (*Iskaashiga Xubnaha haysta caymiska iyo Dual Advantage oo kaliya*)

Xubnaha iskaashatada ah ee sidoo kale haysta Medicare waxay heli karaan racfaan dheeraad ah iyo xuquuqaha cabashooyinka. La hadal Khabiirka Xuquuqaha Xubinta si aad wax badan ugu ogaato.

